

Hordhaca Mashruuca Liisanka labada ah ee Bayloodnimada



Mashruuca

Mashruuca Liisanka labada ah ee Bayloodnimada wuxuu abuuray nidaam kaas oo caawinaya shaqsiyaadka kuwaas oo noqonaya kuwo laba liisan ka haysta Qaybta Caruurta ee Gobolka Washington, Dhalinyarada, iyo Qoysaska (DCYF) ee labadaba korinta caruurta iyo daryeelka caruurta.

Ujeedada

- Si loo horumariyo nidaamyo iyo siyaasado kuwaas oo kordhin doona helitaanka shaqsiyaadka oo ay helaan isku darka liisanka koriinka caruurta iyo daryeelka.
- Si loo kordhiyo helitaanka daryeelka caruurta meelaha kuwaas oo loo aqoonsaday in ay caqabad ku yihin meelaha caruurta lagu koriyo.

Inta la daboolayo

- Guryaha koriinka qoysaska caruurta iyo guryaha qoysaska daryeelka caruurta ee liisanka ka haysta Gobolka.
- Qofka liisanka haystaa haduu marhoreba haystay hal liisan (daryeelka koriinka ama daryeelka caruurta qoysaska guryaha) heer wanaagsan ugu yaraan halsano.
- Qofka liisanka haystaa waa in da'diisu ahaataa 21 sano ama ka waynada.
- Meelaha daryeelka caruurta koriinka waa in aanay ka badnaan lix.
- Meelaha daryeelka caruurta koriinka oo aanay ku jirin meelaha caruurta hela Adeegyada Dhaqancelinta Dabeecadaha marka bayloodnimada. Hadii ay la xidhidho Adeegyada Dhaqancelinta Dabeecadaha marka goobta, kooxda labada liisan waxay qiimayn doonaan in ay sii socoto ka qaybqaadashada barnaamijka.
- Meelaha caruurta lagu koriyo oo aanay ku jirin meelaha qiimaynta heer afraad, hadii ay la garanayo meesha. Hadii heerka qiimaynta kor loogu qaado heerka afraad marka goobta, kooxda labada liisan waxay qiimayn doonaan ka qaybqaadashada barnaamijka.

- Liisanka daryeelka caafimaadka waa in aanay ka badnaan 12 caruur ah.
- Saacadaha daryeelka caruurta waa in aanay ka badnaan 6 am ilaa 6 pm si loogu ogalaado wakhti ku filan qoysaska. Waxyaabaha reeban waa la damaanad qaadi doonaa iyadoo ay ku salaysan si shaqsiyan ah. Aan ku jirin daryeelka habeenkii.
- Waxa jiri doona soofti ah 20 ka qayb qaatayaasha haysta laba liisan inta lagu gudo jiro wakhtiga bayloodnimada.

Kooxda

DCYF waa koox xamaasadaysan oo si wadajir ah u shaqaynaya, kuwaas oo ay ka mid yihin: maamulaha cilmibaadhista, maamulaha barnaamijka, 1 kormeere koriinka caruurta ah, 1 kormeere daryeelka caruurta, 1 liisan bixiye koriinka caruurta ah iyo 3 liisanbixiyaasha daryeelka caruurta ah.

Mustaqbalka

Mashruuca waxa laga rajaynayaa in uu dhamaado Juun 2022 waxaana losoo jeedin doonaa talooyin Qaybta Sharci samaynta ee Gobolka Washington iyadoo lagu salaynayo waxaan baranay ee ku saabsan bayloodnimada.

Waydiinta

Hadii aad ogsoontahay daryeelka qoysaska guryaha ee koriinka caruurta ama daryeelka caruurta qoysaska guryaha ee liisanka haysta kuwaas oo xiisaynaya in ay noqdaan ka qayb qaatayaasha labada liisan, fadlan soo agaasim iyaga wacyigalin ku haboon si ay ugu socdaan in ay bilaabaan nidaamka. Waxan rajaynaynaa in aan bilaabno shaqaalaysiinta Labada Liisan bixinta badhtamaha bisha Diiseembar 2020.

Macluumaad dheeraad ah fadlan nagala soo xidhiidh iimaylkan michelle.giard@dcyf.wa.gov

Hadii aad jeceshahay nuqulada dhokumantigan nidaam kale ama luuqad kale, fadlan nagala soo xidhiidh Constituent Relations (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION LIC_0016 SM (12-2020) Somali



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES